



## **Waxyaabihii ugu dambeeyey Ciyaaraha: 18 Kooxeed(PIL) waxa ay kasbadeen in lagu muneeyo sharafka Waxbarashada Dhammaan ee Gobolka; iyada oo dhammaan abbaalmarinaha horyaalada kooxaha la shaaciyey**

Kooxaha horyaalada ciyaaraha Portland goormada ciyaaraha iyo goobaha lagu ordo oo kaliya meel sare kaliya kama ayna gaadhin intii lagu gudo jiray wareegii ciyaaraha dayrta ,balse kooxahani (PIL) waxay sidoo kale ay u taagnaayeen sidii ay waxbarashada fasaladooda ay heer sare ka gaari lahaayeen.

Wareega kooxaha ciyaaruhu waxay ka koobnaayeen 18 kooxood ee 10 kooxood ugu wanaagsani ay ka mid ahaayeen heerka 6A ee OSAA iskuulada Dhammaan Kooxaha Goboka oo dhan kuwaasi oo ay kafaalo qaadaan OnPoint Community Credit Union Academic. Liistada waxaa loo soo habeeyey iyada oo la isticmaalayo celceliska wadarta derejada dhibcaha koox kasta oo ka mid ah kooxaha iskuulada u ciyaara.

Ciyaaryahanada kubada cagta wiilasha ee Dugsiga Sarre ayaa iyagu ku guuleystay inay noqdaan kooxda ugu sareysa ciyaaraheedii, iyaga oo celcelis ahaan dhinaca waxbarashadana hantay markii la isku daray 3.75 GPA. Kooxda Generals waxa ay ka mid noqdeen mid ka mid ah shanta kooxeed PIL ee 10 kooxeed kubada wiilasha ee cagta ciyaarayey. Gabdhaha orodka ee Dugsiga Sarre ee Cleveland ayaa igu ahaa kooxda hanatay (GPA)derejadii celcelis ahaan ugu sareysay dhammaan kooxihii ciyaarayey xilliga dayrta, iyaga oo keenay 3.95, iyaga oo dhinaca ciyaarahana ka noqday kaalinta saddexaad.

Kooxaha PIL waxaa Gobolka oo dhan looga aqoonsaday inay dhinacii Waxbarashadana Kasbadeen:

- **Kubada Cagte ee Wiilasha:** Dugsiga Sarre Grant Kaalinta 1aad, Waxbarashada 3.75; Kaalinta 3aad Dugsiga Sarre ee Lincoln, dhinaca waxbarashada 3.67; Dugsiga Sarre ee Wilson kaalinta 5 aad, dhinaca waxbarashada 3.63; Kaalinta 8aad Dugsiga Sarre ee Cleveland, xagga waxbarashada 3.55; Kaalinta 10aad Dugsiga Sarre ee Roosevelt, dhinaca waxbarashada 3.46.
- **Kubada Cagta ee Gabdhaha:** Kaalinta 2aad Dugsiga Sarre ee Madison, dhibcaha waxbarashada 3.86; Kaalinta 6aad Dugsiga Sarre ee Grant, dhibcaha waxbarashada 3.81; Kaalinta 7aad Dugsiga Sarre ee Wilson, waxbarashada 3.80; Kaalinta 10aad Dugsiga Sarre ee Cleveland, dhibcaha waxbarashada 3.79.
- **Orodadda Wiilasha:** Kaalinta 3aad Dugsiga Sarre ee Wilson, dhibcaha waxbarashada 3.87; Kaalinta 5aad Dugsiga Sarre ee Grant, dhibcaha waxbarashada 3.84; Kaalinta 7aad Dugsiga Sarre ee Cleveland, dhibcaha waxbarashada 3.82.

- **Orodadda Gabdhaha:** Kaalinta 3aad Dugsiga Sarre ee Cleveland, dhibcaha waxbarashada 3.94; Kaalinta 5aad Dugsiga Sarre ee Grant, dhibcaha waxbarashada 3.93; Kaalinta 7aad Dugsiga Sarre ee Lincoln, dhibcaha waxbarashada 3.91.
- **Kubada Laliska:** Kaalinta 2aad Dugsiga Sarre ee Cleveland, dhibcaha waxbarashada 3.91; Kaalinta 3aad Dugsiga Sarre ee Wilson, dhibcaha waxbarashada 3.80.
- **Football:** Kaalinta 6aad Dugsiga Sarre ee Lincoln, dhibcaha waxbarashada 3.32.

Liistada kooxaha Waxbarashada Dhammaan-Gobolka oo dhammeystiran halkan ayaad ka arki kartaa marka aad gujiso [OSAA program webpage](#).

### **Kooxihii Dhammaan Lagu Dhawaaqay Kaalmaha ay Tartankii Ka Galeen**

Tartankii Kooxaha Iskuulada(PIL) wuxuu ku dhawaaqay inuu dhammaan kooxihii ka qeybqaatay ciyaaraha abbaalmarin siiyo iyaga oo ay u codeeyeen tababarayaasha ciyaaraha kala gedisan:

**Kubada Lalliska:** Dugsiga Sarre ee Wilson, wuxuu ku guuleystay derejada tartankii 16-0 oo ah rikoodh, isaga ayaana wada qaatay wixii abbaalmarin ahaa oo dhan. Arday fasalka 12naad ku jira oo uga ciyaaraha inuu ka soo gano xagga dambe lana yiraa Kenneday Stahr ayaa ku guuleystay abbaalmarinta Ciyaaryahanka Sanadka, iyada oo sidoo kalena loo codeeyey Mark Mendak inuu noqdo Tababaraha Sanadka labadii sano ee ugu dambeeyey . [Halkan ka fiiri liistada Tartanka Ciyaaraha oo dhan](#)

**Kubada Cagta ee Wiilasha:** Waxaa iyaguna abbaalmarinta sanadka ku guuleystay Mo Mohamed oo fasalka 11naad ee Dugsiga Sarre ee Cleveland iyo Chris Lambert oo ku jira fasalka 12naad ee Dugsiga Sarre Lincoln ka dheelayey khadka difaaca ayaa waxa ay wadaagayaan Abbaalmarinta Ciyaaryahanka Sanadka ee Weerarka, waxaa iyaguna loo codeeyey Ian Cameron oo fasalka 12naad ka dhigta Dugsiga Sarre ee Grant iyo Vincent Rose oo fasalka 11aad ka dhigta Dugsiga Sarre ee Franklin Abbaalmarinta Ciyaaryahanada Difaaca Sanadka labadii sanno ee isxigay. Waxa sidoo kale loo codeeyey Ty Kovatch oo ka socda Dugsiga Sarre Franklin inuu noqdo Tababaraha Sanadka ka dib markii abbaalmarintaasi sanadkii horena la wadaagay. [Halkan ka fiiri liistada tartanka ciyaaraha oo dhammaystiran](#)

**Kubada Cagta ee Gabdhaha:** Ruby Donaghe oo fasalka 12naad ka dhigata Dugsiga Sarre ee Grant senior waxaa loo doortay inay noqoto Weeraryahanka Ciyaarta ee Sanadka, iyo sidoo kale Goolhayahe Olivia William oo fasalka 12naad ka dhigata Dugsiga Sarre ee Wilson ayaa loo codeeyey inay noqoto Ciyaaryahanka Difaaca ee Sanadka. Waxaa iyana loo codeeyey Jennifer Lohse oo tababare ka ah Dugsiga Sarre ee Roosevelt inay noqoto Tababaraha Sanadka. [Halkan ka fiiri liistada tartanka ciyaaraha oo dhammeystiran.](#)

